## Waa maxay xulashooyinka aan haysto?

Haddii aad rabto in xogtaada loo isticmaalo si laga jawaabo su'aalaha cilmi-baarista caafimaadka ee muhiimka ah, ama adeegyo ka fiican lagugu qorsheyo adiga, qoyskaaga iyo dadka kale, markaa uma baahnid inaad wax sameyso. Xogtaada si otomaatig ah ayaa loo isticmaalaa ujeeddooyinkan.

Si kastaba ha ahaatee, waxaad dooran kartaa inaad joojiso in macluumaadkaaga bukaanka loo adeegsado cilmi-baarista iyo qorshaynta. 'Ka -bixitaanka' wuxuu quseeyaa qof kasta oo ka weyn 13 sano oo ku nool England. Haddii aad ku nooshahay meel kale oo UK ah, xogtaada waxaa laga yaabaa in si kale loo maareeyo.

Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa

**www.nhs.uk/your-nhs-data-matters**



## Ku saabsan PIONEER

PIONEER wuxuu u oggolaanayaa cilmi-baarayaasha inay u isticmaalaan xogta caafimaadka si ammaan ah oo aamin ah, si ay gacan uga geystaan hagaajinta ogaanshaha, daaweynta iyo adeegyada. Tani waxay awood weyn u leedahay in lagu hagaajiyo nolosha bukaanka.

Xogta PIONEER waxay ka timaaddaa bixiyeyaasha daryeelka deg-degga ah sida adeegga ambalaaska iyo shilalka iyo waaxaha gurmadka. Daryeelka deg-degga ah - oo ah daryeel caafimaad kasta oo aan la qorshayn - waa qayb weyn oo ka mid ah culeyska shaqada NHS, sidaa darteed cilmi-baarista aaggani waa muhiim.

Guddigeena xubnaha dadwaynuhu waxay naga caawiyaan inaan go'aanno ka gaarno mashaariicda aan taageerno. Haddii kooxdani aysan ku qanacsanayn inay mashruuc cilmi baaris gaar ah la wadaagaan xogta, sabab kasta ha ahaatee, markaa xogta lama wadaagi doono.

**Waxaad wax badan oo ku saabsan cilmi -baarista PIONEER ka heli kartaa**

**pioneerdatahub.co.uk/ your-data-could-improves-lives**

Haddii adiga, xubin qoyskaaga ah ama saaxiib faa'iido idin yahay macluumaadkan oo ku qoran luqad kale, waxaad boggeena internetka ka heli kartaa nooc maqal ah iyo PDF la soo dejisan karo/la daabici karo.

PIONEER waa qayb ka mid ah shabakadaha xarumaha xogta caafimaadka, oo ay maalgeliso Health Data Research UK iyo UK Research and Innovation.

UNIVERSITY OF BIRMINGHAM

NHS University Hospitals Birmingham NHS Foundation Trust

# PIONEER
Health Data Research Hub

## Xogtaada caafimaad ayaa badbaadin karta nolosha

Isticmaalka xogta caafimaadka ee sida joogtada ah loo soo ururiyey si cilmi -baaris laga sameeyo ayaa caawineysaa dadka kale iyadoo lagu hagaajinayo waayo-aragnimada bukaanka iyo natiijooyinka.



Ogow wax badan oo ku saabsan mashaariicda caafimaadka ee PIONEER uu taageerayo, sida xogta caafimaadka loogu isticmaalo cilmi -baarista, iyo waxa xulashooyinkaagu yihiin.

**pioneerdatahub.co.uk/your-data-could-save-lives**

## Awood u leh hagaajinta nolosha

Xogta caafimaadku waa macluumaadka ay takhaatiirta iyo kalkaaliyayaashu kaa ururiyaan adiga markaad u booqato isbitaal, GP ama bixiye daryeel caafimaad kale. Waxay u oggolaanaysaa inay ku siiyaan daryeelka caafimaad ee ugu fiican ee suurtogalka ah, waxaana sidoo kale loo adeegsadaa cilmi-baaris - si loo horumariyo daaweynta cusub ee bukaannada - iyo si loo hagaajiyo adeegyada.

Marka xogta caafimaadka loo adeegsado cilmi - baaris, waxaaa laga dhigaa mid qarsoodi ah. Tan macnaheedu waxaa weeye in dhammaan qaybaha xogta ee lagugu aqoonsan karo laga saaray, mana jirto hab ay cilmi-baarayaashu ku aqoonsan karaan qofka aad tahay xogtaada.

Malaayiin ka mid ah diiwaannada caafimaadka bukaanka ee ay hayso NHS-ta ayaa leh awood aad u weyn oo cilmi baaris ah.

Cilmi-baarista xogta caafimaadka si loo wanaajiyo daryeelka caafimaad ee dhammaan bukaannada, xogtu waxay u baahan tahay inay tusaalayn u noqoto dhammaanteena - dadka ka soo kala jeeda qowmiyado kala duwan, asal iyo dhibaatooyin caafimaad oo kala duwan. Tani waa sababta xogta caafimaad ee qof walba loogu isticmaalo cilmi-baarista, aysan ka ahaayn haddii aad doorato inaad ka baxdo.

## Waa maxay xogta la uruuriyo?

**Diiwaankaaga caafimaadka waxaa ku jira macluumaad adiga iyo caafimaadkaaga ku saabsan, sida:**

- Da'da
- Isirka
- Astaamaha
- Xaalado caafimaad oo kale
- Baaritaan kasta oo lagugu sameeyay, sida baaritaanno dhiig
- Natiijooyinka baaritaanyada
- Sawirrada jirkaaga laga qaadey, oo ay ku jiraan raajada
- Xaaladaha caafimaad ee lagugu ogaaday
- Daawooyinka laguu qoray

Xittaa inkastoo diiwaannada caafimaadkaagu ay ku jiraan magacaaga, lambarka NHS, taariikhda dhalashada iyo cinwaankaaga, tan weligeed lalama wadaago ujeeddooyin cilmi-baaris si loo ilaaliyo sirtaada.



## Yaa heli kara?

Xogta waxaa lala wadaagaa oo kaliya cilmi-baarayaasha ka dib markii si taxaddar leh looga fiirsado. Baarayaasha iyo mashaariicdooda waa inay buuxiyaan shuruudo adag oo sharci iyo anshaxeed si loo oggolaado inay helaan xogtaada.

**Xogta caafimaadkaaga waxaa lala wadaagi doonaa oo kaliya:**

- Cilmi-baareyaal lagu kalsoon yahay, loo tababaray inay si ammaan ah u maareeyaan xogta
- Mashruucyada cilmi-baarista oo leh karti ay ku anfacaan dadweynaha

**Baarayaasha waxaa loo oggolaan doonaa oo keliya helitaanka xogtaada caafimaad haddii:**

- Waxyaabaha si toos ah lagugu aqoonsan karo sida magaca iyo cinwaanka, ayaa laga saaraa xogta la wadaago
- Xogtaas waxaa lagu heli karaa uun deegaanno sugan oo si fiican loo baaray
- Natiijooyinka ayaa si ammaan ah loo soo sheegi doonaa, si aan loo aqoonsan shaqsiyaadka